

Xaashida macluumaadka 1aad Garashada linta ee Australia dhexdeeda

Xaashidan macluumaadka waxaa sameysay Qareenadda AMPARO si ay u siiso dadka ka soojeeda bulshooyinka dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan kala duwan taasoo wadata macluumaad ku saabsan iinta oo turjuman

1. Waa maxay iintu?
2. linta Australia dhexdeeda
3. Noocyada iinta
4. Hore u-helidda taageerada
5. Helidda taageerada aad u baahan tahay
6. Halka laga helo caawimaadda
7. Isbaddalada cusub si loo taageero dadka iinta qaba
8. Helidda turjumaanka
9. Helidda caawimaad si aad u hadasho



1. Waa maxay iintu?

Qofku wuxuu qabaa iin haddii ay ku adkaato, inay naftooda daryeelaan, ay socdaan ama dhaqdhaqaaqaan, wax maqlo ama wax arko ama si qeexan u fakaro, ama wax barto. Waxaa ku adkaanaysa inay howlo kasta qabtaan.

“**linta**” waxaa keeni kara shilka, jirdilka, cudurka, ama waxay noqon kartaa wax qofku ku dhasho. Iintu badanaa waa xilli dheer oo jiraya, oo daa’imaysa nolosha qofka oo dhan. Haddaba iintu maahan xanuun qofka haya dhowr bilood, ama qaba lafo jaban oo bogsoonaya.

Awoodaha qofka waxaa kaloo saamayn kara sida dadka kale u arkaan ayaga (itijaahyada) iyo beeya’dda jidheed, sida haddii ay ku dhex soconayaan gurigooda, goobta shaqada ama bulshada, haddii ay adeegsan karaan gaadiidka dadweynaha, iyo sida loogala macaamilo bulshadooda.

2. linta Australia dhexdeeda

Halkaan Australia, dadka qaba iinta waxay la xuquuq yihiin oo loo ogol yahay inay sameeyaan wax la mid ah kuwa dadka kale ee bulshada sameeyaan. Tusaale, waxay leeyihiin xaq in loola dhaqmo si caddaalad ah, inay wax bartaan oo shaqaystaan, ay doortaan halkay ku noolaanayaan, iyo sida ay u noolaanayaan noloshooda.

Dadka qaba iinta waxay heli karaan nolol wacan, gaaraana hadafyadooda iyo riyoooyinkooda, ayna ka mid noqdaan oo wax ku taraan bulshadooda. Dadka qaba iinaha waxay leeyihiin awoodaha iyo kartiyo badan waxayna awoodaan inay bartaan xirfadaha cusub.

Dadka qaba iinta waxay doonayaan in lagu daro dhammaan qaybaha nolosha iyo bulshada, sharciyada Australiyana way ku caawiyaan inay sameeyaan sidaas. Australia dhexdeeda, waxaa sharci darro ah in qofka lagu takooro iintiisa.

Qabidda iinta waxay la macno tahay in qofka waxyaalaha u sameeyo si ka duwan, waxayna u baahan karaan noocyo kala duwan oo caawimaad ah. Waxay u baahan karaan caawimaad si ay:

- u qubaystaan ama u maydhaan
- u labistaan
- ugu seexdaan ama uga toosaan sariirta
- u hadlaan ama loo fahmo
- usoo dukaamaystaan
- uga mid noqdaan bulshada
- u aadaan shaqada ama ballamaha caafimaadka
- usoo gataan qalab sida kursiga curyaanka
- u daryeelaan guryahooda ayna u helaan nolol wacan

3. Noocyada iinta

Iinta caqliyeed

Dadka qaba iinta caqliyeed way ka dhibaato badan yihiin dadka kale xaga barashada waxyaalaha cusub, xallinta dhibaatooyinka, xagga xoogsaarista iyo xusuusashada. Waxyaalaha ugu badan oo keena waa -

- ku dhalashada iinta
- dhibaatooyinka iinta uurku jiro (tusaale, helid la'aanta ogsajiin ku filan)
- dhibaatooyinka caafimaadka
- helid la'aanta cunto ku filan, ama helid la'aanta daryeelka caafimaadka

Iinta Jidheed

Iinta jidheed waxay saamaysaa shaqooyinka jidhka qofka ama awoodda inuu dhaqdhaqaaqo, tusaale ahaan socodka ama kaadi cesashada. Ama waxay saamaynaysaa qayb jidhkiisa ka mid ah, tusaale ahaan lug la'aan ama gacan la'aan. Waxaa jira sababo badan oo keena iinta jidheed, qofku wuxuu ku dhalan karaa sidaas, ku-dhicidda shilka ama cuduro. Iinta jidheed waxaa ka mid ah dhaawaca xungulaha, dhantaalanka maskaxda, iyo adkaanshaha unugyo fara badan (multiple sclerosis).

linta neerfaha

linta neerfaha waxay saamaysaa sida maskaxdu wax uga qabato macluumaadka ayna ula xiriirto jidhka intiisa kale, tusaale ahaan, hadalka, fikirka iyo dhaqdhaqaaqa. Dadka sidaas bay ku dhalan karaan, ama iin baa ku dhici karta noloshooda dambe ama waxay ka helaan iinta shil ku dhacay.

Xanuunka dhimirka

Dadka qaba xannuunka dhimirka waxay ku qabaan dhibaatooyinka siday u fakaraan, wax u dareemaan ama u-dhaqmaan, taasoo saamayn karta xiriirkooda, awoodda ay ku shaqeeyaan ama ku nool yihiin. Tusaale ahaan qofku wuxuu qabi karaa buufis daran kaas oo saameeya awoodooda inay ka qaybgalaan noloshooda maalin kasta. Taasi waxay saamayn kartaa xiriirkooda, shaqadooda, raaxada noloshooda.

linta dareenka

Tan waxaa ka mid ah beelidda maqalka, kala-dhantaalanka aragga ama kala-dhantaalanka hadalka.

Dhaawaca Maskaxeedka kugu dhacay

Dhaawaca maskaxda oo la helo waa dhaawac maskaxeed kasta kasoo dhaca dhalashada ka dib. Taas waxaa keeni kara gaari, cayaaro ama shilal kale, istaroorga, burada maskaxda, khamriga, ku-xadgudubka daroogada ama sumowga. Saamaynta ay leedahay dhaawaca maskaxdu wuxuu noqon karaa mid yar, muddo gaaban, ama wuxuu noqon karaa mid daran oo muddo dheer.

Autism-ka

Dadka qaba Autism-ka waxaa dhibaatooyin ka haystaan luqadda ama wada-hadalka iyo barashada xirfadaha bulshadeed, waxay xasaasi u noqon karaan codadka, taabashada, dhadhanka, urka, ilayska ama midabada.

4. Hore u-helidda taageerada

Haddii aad u malaynayso in ilmahaagu uu qabo iin helidda caawimaad sida ugu dhaqsaha badan waxay ka caawin kartaa ilmaha inuu koro oo horumaro, taasoo noqon karta inay hadhow u baahdaan caawimaad yar.

Helidda caawimaad hore waxay ka taageeri kartaa qoysaska inay fahmaan iinta ilmahooda, iyo inay siiyaan daryeelka fiican ilmahooda.

5. Helidda taageerada aad u baahan tahay

Dadka qaarkiis oo qaba iinta iyo qoysaskooda waxaa aad ugu adag inay helaan caawimaadda ay u baahan yihiin. Waxaa muhiim ah inaad fahamto waxay iintu tahay. Waxaad kala hadli kartaa dhaqtarkaaga wax ku saabsan sida loo ogaado haddii aad qabto iin. Waxaa jira adeegyo iyo taageerooyin kuwaas oo caawin kara dadka qaba iinta iyo qoysaskooda.

6. Halka laga helo caawimaadda

Haddii aad ku nooshahay Queensland oo hadda adiga ama xubin qoyskaaga ah u baahan tahay caawimaad, Waxaad wici kartaa 13 74 68 waxaadna ka codsan kartaa inaad kala hadasho cid ka socota Adeegga linta wax ku saabsan xaaladaada.

7. Isbaddalada cusub si loo taageero dadka iinta qaba

Saddexda 3 sano ee soo socota waxaa jiri doona isbaddalo waaweyn iyo horumaro sidii dadka qaba iinta iyo qoysaskooda ay u heli lahaayeen taageerada ay u baahan yihiin. Waxaad kala socon kartaa adigoo ka eega Website-ka National Disability Insurance Scheme www.ndis.gov.au ama ka waca taleefanka 1800 800 110 ama 131 450 haddaad u baahan tahay turjumaan.

8. Ma u baahan tahay turjumaan ama macluumaad la turjumey?


Dhammaan adeegyada loogu talagalay dadka qaba iinta kuwaas oo ay maalgeliso Dowlad-goboleedka Queensland waa inay bixiyaan turjumaano markii loo baahdo, waxaadna codsan kartaa turjumaan. Mashruuca National Disability Insurance Scheme wuxuu kaloo bixiyaa turjumaano. **Turjumaanada waxay qaateen tababar waana inay u ilaaliyaan macluumaadkaaga si qarsoodi ah.** Adeegyadu waa inay macluumaadka kuu siiyaan si aad fahmayso, tusaale ahaan, waxaad ka codsan kartaa inay kuugu turjumaan macluumaadka luqaddaada.



9. Taageerada u-qareenidda

Haadii aad cawimaad u baahan tahay si aad uga hadasho wax ku saabsan waxaad u baahan tahay, waxaa laga yaabaa inaad caawimaad ka hesho haya'daha qareenidda inay sidaas kuu sameeyaan.

Halkan Queensland, Waxaad la xiriiri kartaa-	
AMPARO Advocacy (Brisbane)	3369 2500
Capricorn Citizen Advocacy (Rockhampton)	4922 0299
Gold Coast Advocacy	5564 0355
Independent Advocacy Townsville	4725 2505
Ipswich Regional Advocacy Service	3281 6006
Mackay Advocacy Inc	4957 8710
Queensland Advocacy Incorporated	3844 4200
Rights In Action Incorporated (Cairns)	4031 7377
Speaking Up For You (Brisbane/ Caboolture)	3255 1244
Sunshine Coast Citizen Advocacy	5442 2524
The Advocacy and Support Centre (Ipswich)	3812 7000
The Advocacy and Support Centre (Toowoomba)	4616 9700



People with Disability Australia

1800 422 015

(Bundaberg, Fraser Coast, Logan, Mt Isa, Sunshine Coast)

Waa ok in la cabto.

Xusuusnow, haddii lagu sheego inaad la xiriirto haya'd, hase ahaatee aysan ku caawin, waa okay inaad ku noqoto oo aad ka codsato caawimaad ka fiican sidii hore, ama aad ka cabato.

Haddaad dareento in lagu takoorayo ayadoo ku salaysan dhaqankaaga ama iintaada, Waxaad kaloo kala xiriiri kartaa Queensland Anti-Discrimination Commission taleefanka 1300 130 670.

Macluumaadkan waxaa sameeyey AMPARO Advocacy Inc. in kastoo dadaal kasta lagu bixiyey si loo hubiyo inuu sax yahay waqtiga la daabacayo, qoraalkan waxaa loogu talagalay inuu bixiyo xog guud hase ahaatee waxaa laga yaabaa inuusan sax ahayn, cusbayn ama uusan ku dhammayn xaaladdaada. Talooyinka shaqsiyeed oo dheeraad ah ayaa aad loogu talinayaa.



9 Chippendall St, Milton QLD 4064
info@amparo.org.au, www.amparo.org.au

phone 07 3369 2500
Interpreter Service 13 14 50

